



## PPS waxay Gaadhay Saamiga Chromebook ee 1:1, Waxaana Mahaddaas leh Codbixiyayaasha iyo Saaxiibada Deeqsiiinta ah

Dugsiyada Dadwaynaha Portland waxay ka gaareen hadaf wayn xaqiijinta in ardaydayadu helaan teknoolojiyadda ay u baahan yihiin deegaanka waxbarasho ee qarniga 21<sup>aad</sup>. Dayrtan, PPS waxay noqotay waxa loo yaqaan degmada Chromebook ee 1:1, taasi oo ka dhigan in arday kasta oo fasalada 3aad ilaa 12aad ah la siiyey Chromebook uu dugsiya iyo guriga ku isticmaalo.

Saamiga waxa suurto galiyey codbixiyayaasha Portland ee deeqsiiinta ah, kuwaasi oo ansixiyey [Curaarta Dugsiga 2020](#) ee \$1.2 bilyanka ah, taasi oo \$128.2 milyan oo ka mid ah loo qoondeeyey sare u qaadista teknoolojiyadda tacliineed. Sidoo kale waxaanu aad uga faa'idnay [saaxiibtinimadayada Verizon](#), taasi oo suurto galisay in la siiyo aalado bilaash ah ardaydayada, oo ay ku jiraan 2,500 oo dayrtan oo kaliya la siiyey ardayda Dugsiyada Dhexe ee George, Kellogg iyo Lane, iyo Dugsiga Sare ee Roosevelt.

Marka laga tago saamiga 1:1 ee fasalada 3-12, PPS waxay samaysay saami ah 2:1 oo loogu talagalay ardayda K-2 (Barbaarinta ilaa fasalka 2aad). Hal aalad ayey heli karaan laba arday oo kasta oo dhigta K-2, iyagoo Chromebook-yada fasalka looga tagayo.

Barnaamijka waxa loo bixiyey [“PPS 121”](#) (qof-iyo-mid). Teknoolojiyadda qof-iyo-mid waxay bixinaysaa waxbarasho goorkasta/goobkasta ah waxayna albaabada u furaysaa halabuurka, bulshada, xiriirka iyo xirfadaha fekerka xiska naqdigaa kuwaasi oo ardaydu u baahan yihiin si ay ugu tartami karaan gacanna uga gaysan karaan bulshada deegaanka iyo tan caalamka oo dhan.

Ardayda iyo qoysaska waxay wax badan kaga ogaan karaan Chromebook-yada PPS barta [webbeejka aaladaha](#) ee Xafiiska Teknoolojiyadda iyo Ammaanka (Office of Technology and Security, OTIS). Macluumaadka ku saabsan asturnaanta, helidda iyo celinta Chromebook-yada, fahmida xisaabaha ardayga, iyo daryeelidda iyo masuuliyad aaladda waxa laga heli karaa [webbeejka Ardayda & Qoysaska](#) ee OTIS.

Marka laga tago sare u qaadista aaladaha, shaqada teknoolojiyadda Curaarta Dugsiga lagu maalgaliyey waxa ku jiri doonaa internet faybar obtig ah oo dugsi kasta la galiyo, helitaanka internetka la horumariyey fasal kasta iyo meelaha aan fasalka ahayn, borojactarrada leysarka oo sawirkooda tayadiisu sarrayso, iyo cod baahiyayaal fasalka kasta yaala. Wax badan kaga ogow [webbeejka Curaarta Horumarinta Teknoolojiyadda Waxbarashada](#).